Somalia Waxay u Baahan Tahay Dib-u-Heshiisiin Dhab ah

Markaan taariikhda casriga ah tix gelino, toban iyo shan sano ayan iska soo horjeednay oon dagaal isku haynay; is baabi'inay oon is bur-buriney, markaas ayaan dalkana hilfaha u qaadnay, annagoo marna is warsan halka ay balaayada nooga timid.
Waa wax dhacay, sideenna oo kale, dad iska hor-yimid. Dagaalka noocaas ah waxuu ku yimaada marka labada waalaaha ah la isku diro; dad kale ha isku diraan ama wax dhexyaala ha isku qabtaan. Waa la arkay dad isku mid ah, isku diin ah oo isku madhad ah oo haddana is dkilaafa; laakin dad badan oo qaarado kala duwan kala jooga, waxay la yaabaan sababta ay Soomaalida isku haysato ama isku dileyso.

Soomaalida waa dadka tira yar, weliba gaar ahaan qaaradda Afrika marka lo eego, oo isku dad ah, isku diin ah isku afna ah. Waxan ku dhibtoodaa in aan jawaab ka bixiyo meesha nalaga haysto. Aqoon naguma yara, caqli nagu filana Ilahay waa ina siiyey, dhul na wada deeqa iyo bad barwaaqo lehna Ebbe waa nagu maneystay; marka xagee wax ka dibac san yihiin ayan is warsadaa, markaan dib isugu noqdo.

Jawaabta waa la ila leeyahay, hase yeeshee, ma dhahaa, sababta waxay tahay in la iga caqli badiyey oo la i maxkax dhaqay? Ama meel baan ka dibac sanahay oo laga faa'iideystay; waxaa la iga dhigtay mishiinka meesha fog laga maamulo (Remote control Robot) oo sidii la rabo loogu adeegto.

Qabiil waa jiraa, Ilaahey ayaa Qur'aankiisa ku sheegay, hase yeeshee, markii si aan loogu talo gelin loogu dhaqmo, qarka ayuu qofka ka tuuraa. Qarannimo iyo qabiilna isku qol kuma dhaqmaan. Waa la soo arkay qabiil halka uu dalkeena dhigay, waxaanna dhibaatadiisa caddeeyey Cabdullahi Suldaan Tima Cadde oo yiri, "Dugsi ma laha qabyaaladi waxay dumisa moyaanee".

Dadka gabayada tiriyana waxay sheegaan waa run. Ilaa iyo hadda cid noo sheegi karta ma jirto in qabiil cid wax ku kordhiyay, haddii ay jiraan wax aan khasaare aheyn kuma kordhin. Welise waxaa taagay su'aasha ah, Xagee nalaga haystaa?

Kuma qanci karo marka qofka i yiraahdo, dagaal waa dhici jiray; dagaalkii I, kii II iyo dagaaladii ka horeeyey oo sanado badan soo socday, waa jireen. Dadka waa dagaalamaa, waana heshiiyaa. Awood waa lagu dadaalamaa, waa la kala guuleystaa. Marka dagaal sokeeye dhaco, sideenna oo kale, waa laga heshiiya, waxii dhacayna waa la iska cafiyaa, si noolasha halkaas looga wato.

Dalka dadka ayuu ka dhexeeyaa, nolol iyo mustaqbal ayaa loo halgamaayaa. Qofka is yiraahda awood ayan u dagaalamaayaa, waa inuu marka hore ku fikiraa in uu yahay qof damacsan dadka oo dhan inuu wax u qabto; in uu dalka hor-u-markiisa ku fikiro. Soomaalida ilaa maanta dagaal ku soo jirtay, waxay weli garan la'aday sababta an dagaalka ugu jirno. Waa marqaati ma doonto, ilaa hadda in dhamaan inta sababtay xaaladda maanta dalka ku jiro in ay yihiin dad ummadda Somaliyeed ka hortaagan iney horumar gaarto. Waxaa su'aal iga ah in weligood ay is warsadeen sababaha loo soo siiyo qalabka dagaalka ay dadkooda ku dilaan, dalkooda ku burburiyaan.

U fiirso, dadlkeena ma burburinin dad ama ciidan dibadaha ka yimid. Gacanta shisheeye waxay adeegsatay oo qurah dadka u dhashay dalka iyagoo lagu wajahay xitaa meelaha halbowlaha u ah dhaqaalaha dalka iyo noolasha dadka iney baa'biyaan. Annaga ayaa curyaaminey dadkeenna iyo dalkeenna. Annaga ayaa u fuliney cadawga mashruucii uu ka lahaa dalkeenna, asagoo dibadda kontroolka ka haaya.

Isku dirka dhexdeenna waxuu gaarey heer aan xitaa qoysaskii isku dhex jirey oo caruurta isu dhalay, la is necbeysiiyo. Debkaas holcaayo, waxaa saliidda ku sii daadinaa, dadka raba in ummadda iyo dalka Soomaaliya aysan dib dambe madaxa kor u soo qaadin.

Markaan u soo jeesto arrinta maanta na haysata, waxaa soo baxaya in xaaladda ay tahay maahmaahdii ahayd, "Cidina uma maqna ceelna uma qodna"

Laba sano ayaan dhex joognay dalka Kenya, laga soo bilaabo Eldored 15 October 2002 ilaa Mbagathi, Nairobi 10 October 2004, oo laga qayb galay Shirka Dib-u-Heshiisiinta Soomaalida laguna doortay Barlamaan iyo Madaxweyne.

Ilaa intii u socday shirkaas oo lagu magacaabay Shirka Dib-u-Heshiisiinta Soomaaliya, ma jiraan cid la heshiisiiyey iyadoo la ogsoonyahay in waxa loo shiraayey uu ahaa in dadkii iska soo horjeeday la heshiisiiyo? Jawaabta waxay tahay, "Iska dhaafee dad in la heshiisiiyo, kuwii heshiisisnaa ayaa lakala geeyey oo la isku diray".

Ugu dambeystii, markii dawladahii bixinaayay kharajka shirka, ku hanjamay in ay joojinaayaan miisaaniyadda, haddii aan la soo af jarin shirka, ayaa qaybtii rabtay in qabta aduunka ay maqalsiiyaan oon aan waxna loo qaban Soomaaliya, ayaa ku guuleysatay in ay juujuubto Baarlamaan ay ku jiraan dadkii is wada haystay oo aan dhex marin wax heshiis ah.

Wixii tagay, waa tahay, dadkii horey saaxibada u ahaa ayaa maanta iska soo horjeeda oo danahooda iska hor-imid. Ra'iisul Wasaarahii Ingiriska Winston Churchill ayaa ku maah maahay, "Saxiibtinimo joogto ah ma jiraan, cadawtinimo joogto ah ma jiraan, waxaa jira dan joogto ah".

Danta ummadda waxay ku jirtaa in dib la isugu noqdo oo loo soo jeesto danta guud ee dalka iyo dadka. Waxaa noo baxay in la isku keyn diraayey, annagoo aan ogeyn in aan u shaqeneyno dan dad kale. Sidaan dan nooma ahee, Dib-u-heshiisiin dhab ha ma ku dhaqaaqnaa? Ilahay xaggisa ma u noqonaa oo ma tooba keenaa? Is cafis guud oo lilaahi ah ma is cafinaa? Haddii heshiis run ah jiri lahaa, waxa ka dhacay Baarlamaanka Soomaaliya si walaaltimo ah oo danta guud ku jirto ayaa looga doodi lahaa oo la isla meel dhigi lahaa. Haddii xaaladda sidaas u socdaanna, weli waxan wadnaa fulinteeda wixii cadawga ummadda Soomaaliyeed uu u qorsheeyey dalkeenna oo ah inaan weligeenna sidaas isaga hor soo horjeedno ilaa yoomal qiyaama, danta dalka iyo dadkana sidaas dhinac ugu tuurno.

Colaadda la dhex dhigay dadka ma ka saarnaa ummadda, si nolosha dib loogu soo celiyo dalka iyo jiilka dambe u helo nolol wanaagsan iyo mustaqbal iftiin leh?

Dhibaato iyo xumaan dhexdeenna nagu filan intii aan soo marnay. Ilaa hadda cid wax iska qaaday ma jiraan, waxa wax laga qaaday waa dalka iyo dadka oo halkaas ku cidlooday kuna baaba'ay.

Ilahay tub toosan ha nagu toosiyo.